DENVER PUBLIC SCHOOLS
Discover a World of Opportunity™

Jadwalka Cusub ee Dugsiga la Aqoonsaday

Dadaalka lagu kordhinayo badbaadada ardayda inta lagu jiro billaha qaboobaha, Denver Public Schools waxay jeclaan lahaayeen inay ku xasuusiyaan Jadwalkooda Daahida Cimilada ee dugsiyada la aqoonsaday. **Jadwalkaan wuxuu daahinayaa dugsiyada bilowdo 8:30 a.m. ama kadib oo hal saac ah. Dhammaan dugsiyada kale waxay sii wadayaan jadwalkooda caadiga ah.**

Qoyskaaga wuxuu u helayaa warbixintaan sababtoo ah dugsiga ardaygaada waxaa saameyn karto Jadwalka Daahitaanka Cimilada. Oo liis buuxo ee dugsiyada la aqoonsaday, booqo weather.dpsk12.org.

Ujeedada Jadwalka Daahitaanka Cimilada waa siinta basaska dugsiga waqti dheeraad ah oo lagu qaadayo ardayda oo lagu yareynayo waqtiga sugitaanka ardayga ee cimilada daran. Go'aanka lagu xirayo ama lagu daahinayo dugsiga waxaa sameynayo Kormeeraha guud sida ku saleysan warbixinta ay bixisay wakiilada ka imaanayo Adeega Gaadiidka DPS, hay'adaha gaadiidka iyo xafiiska cimilada.

Haddii Dugsiyada DPS la kulmaan Jadwalka Daahitaanka Cimilada ee dugsiyada la aqoonsaday:

- Basaska dugsiga subaxa waxay marayaan jadwalka daahitaanka oo ka bilaabayaan qaadista joogsiyada baska hal saac kadib ee ka badan waqtiga caadiga ah. (Tusaale ahaan: Haddii waqtiga qaadida baska subaxa dugsigaaga ay tahay 7:55 a.m., baskaaga wuxuu qaadayaa 8:55 a.m.)
- Ardayda shaqeyneyso, baskiileyneyso, gaari wada raaca ama qaadashada RTD waxaa lagu dhiirogeliyay inay guriga ka tagaan hal saacadood hadhowdii badelkii ay si caadi ah uga tagi lahaayeen dugsiga. (Tusaale ahaan: Haddii ardayda ka tagaaan guriga saacada 7:45 a.m. oo aadaan dugsiga, isaga/iyada waxay hadeer ka qeybsamayaan saacada 8:45 a.m. Imaanshaha waqtigeeda dugsiga.)
- ECE iyo Dugsiga barbaarinta: Subaxa (A.M.) dugsiga barbaarinta lama joojinayo. Waxay ku soconayaa sida waafaqsan daahitaanka. Galabta (P.M.) ardayda dugsiga hore waxay ka qeybgalayaan dugsiga oo helayaan adeega baska jadwalkooda caadiga ah.
- Quracda waxaa weli la siinayaa ardayda markay imaadaan dugsiga.

Haddii dhammaan Dugsiyada DPS u xirmaan sabab la xiriirto cimalada xun:

- Gaadiidka ma marayo baska walba.
- Dhammaan howlaha dugsiga kadib, taas oo ku jirto ciyaaraha dugsiga dhexe iyo hoose, waa la joojiyaa iyo gaadiidka lama siinayo howlahaan.
- Fadlan sameey qorshooyinka muhiimka ah ee daryeelida ardaygaada ee dhacdada in dugsiga la joojiyay.

Haddii dugsiyada DPS sii furnaadaan inta lagu jiro cimilada daran:

- Degmada waxay kormeereysaa cimilada illaa maalinta si loo hubiyo badbaadada ardayga.
- Gaadiidka loo baahanyahay waa la siinayaa. Si kastaba, adeegyada waa la badeli karaa si loo hubiyo in darawalka baska iyo ardayda badbaadaan.
- Xaaladaha taraafikada waxay u baahan kartaa in ardayda ay isticmaalaan waqti dheeraad ah ee wadada ku socoto dugsiga, gaar ahaan howlaha, barnaamijyada ama guriga.
- Haddii cimilada daran bilaabato inta lagu jiro maalinta dugsiga, go'aanka waxaa lagu sameyn karaa si la xiriirto ka ceyrin hore.
- Wadooyinka baska waxay ku soconayaa isla qaabkaas sida caadiga ah ee xigta galabka. Waxay ku xirantahay sharuudaha, waqtiyada imaanshaha ee guriga way ka duwanaan kartaa.
- Kadib howlaha dugsiga (dhacdooyinka ciyaarta, barnaamijyada kobcinta, iwm.) waa la badeli karaa ama la joojin karaa sida ay sababtay xaaladaha cimilada.

Sida looga warqabo:

Dhacdada cimilada xun, saraakiisha degmada waxay sameynayaan go'aanka xiliga 5 a.m. Haddii go'aanka lagu sameeyo in lagu xiro ama lagu daahiyo dugsiga, talefishanka deegaanka iyo kanaalada raadiyowga sial markaas ayaa la ogeysiinayaa oo si joogta ah loogu shaacinayaa ku dhawaaqida xiritaanka dugsiga ama daahitaanada. Sidoo kale waad booqan kartaa thedenverchannel.com, 9News.com, kdvr.com iyo denver.cbslocal.com. Ogeysiinada oo af Isbaanish waxaa lagu sameynayaa wararka raadiyowga ee 1150-AM, 1280-AM iyo 1090-AM.

Weather.dpsk12.org - Xiritaanada degdega ee dugsiga ama daahitaanada cimilada waxaa la soo dhigayaa halkaan iyo transportation.dpsk12.org.
Warbaahinta Bulshada - Ku dhawaaqida lagu xirayo ama lagu daahinayo dugsiga waxaa sidoo kale la soo dhigayaa Facebook.com/DenverPublicSchools, sidoo kale sida @DPSnewsnow iyo @DPSschoolbus ee Twitter.
Qadadka - Fariinta tilmaanto xiritaanka ama bilowga dambe waxaa sidoo kale lagu dhaafayaa qadka xiritaanka dugsiga degmada ee 720-423-3200, sidoo kale sida qadka Gaadiidka DPS ee 720-423-4600.
Aqbaarta Baska - Aqbaarta Baska waa barnaamij ogeysiin koronto ah oo la xiriiro waaladiinta ardayda u qalma gaadiidka iyo warbixinta la xiriirto adeega baska dugsiga jaalaha ah. Waaladiinta waxaa lagu soo ogeysiinayaa dhinaca fariin qoraalka, i-meel ahaan iyo/ama codka fariinta goortii basaska soo daahayaan in ka badan 10 daqiiqo sabab la xiriirto degdega ama daahitaanka cimiladfa. Wixii warbixin dheeraad ah booqo transportation.dpsk12.org/bus-bulletin.

2090 W. 7th Ave. Denver, CO. 80204
720-423-4600 • transportation.dpsk12.org

DENVER PUBLIC SCHOOLS
Discover a World of Opportunity™

Bus Bulletin

Ogeysiinta Ugu dambeysay ee Baska

Haddii aad leedahay ardayda raaco baska jaalaha ah ee dugsiga, iska hubi inaad iska diiwaangeliso barnaamijka Aqbaarta Adeegyada Gaadiidka Denver Public Schools. Adeegaan cusub wuxuu u ogolaanayaa degmada in ay ku soo ogeysiiso warbixinta waqti sax ah iyo aqbaaraha ku saabsan adeega baska ardaygaaga. Waaladiinta waxaa la soo ogeysiinayaa basaska ay imaanayaan in ka badan 10 daqiiqo daahitaan ah oo fariin ahaan, i-meel iyo/ama ogeysiinada codka.

Faa'idooyinka Aqbaarta Baska:

- Waaladiinta iyo dugsiyada waxay helayaan ogeysiinada daahitaanada adeega oo dhinaca fariin qoraalka, wacitaanka taleefonka iyo/ama i-meelka.
- Ma jiraan wax qarash ah oo adeegaan.
- Dhammaan warbixinta ardayda waxaa loo hayaa is qarsoodi ah oo badbaado oo lama wadaagayo. Arimaha gaar ah way illaalsantahay!

Si loo helo Aqbaarta Baska:

Waaladiinta ardayda u qalma gaadiidka waxaa si toos ah looga diiwaangelinayaa inay helaan ogeysiinada codka ah iyo ogeysiinada i-meelka ee Aqbaarta Baska, sida ku saleysan lambarka taleefonka iyo ciwaanka i-meelka ee la sheegay xiliga ardayga laga diiwaangelinayay dugsiga.

Sida loo cusbooneysiiyo goobaha Aqbaarta Baska ama adeega ka bixida:

- **Tallaabada 1:**
  - Gal Akoonka Bogga Waalidka ee myportal.dpsk12.org.
  - Haddii aadan laheyn akoonka Bogga Waalidka, fadlan booqo myportal.dpsk12.org oo riix "Getting Started" si aad u sameysatid akoonkaaga.
- **Tallaabada 2:**
  - Markaad gashid, riix badhanka Gaadiidka ee jaheeyaha dhinaca bidix, kadib riix badhanka Aqbaarta Baska. Tani waxay si toos ah kuu galineysaa websaydka Aqbaarta Baska.
- **Tallaabada 3:**
  - Dhinaca bogga "Welcome Information", riix "Proceed to Your Account" oo waqti ku qaado oo aad ku saxdid sida Aqbaarta Baska kuu ogeysiiso ogeysiinta (i-meelka/qoraalka fariinta/codka notification) ama adeega ka dhaafida. Iyada oo laga saarayo adeega, markale laguma soo ogeysiinayo daahitaanada adeega ee Aqbaarta Baska.
- **Tallaabada 4:**
  - Iska hubi inaad cusbooneysid doorbiditaanka luuqada ee ogeysiinada oo ku dar wixii lambarada taleefonka oo dheeraadka ah iyo ciwaanada i-meelka ee aad jeclaan laheyd inaad heshid ogeysiinada.
    - Si loogu daro lambar cusub riix "Add Phone Number" oo dooro haddii aad jeclaan laheyd in laguugu soo ogeysiiyo ogeysiinta fariinta qoraalka ama codka.
    - Si aad ugu dartid i-meel cusub, riix "Add Email Address."
    - Goobaha luuqada waxaa lagu badeli karaa iyada oo la riixayo dalabka luuqada qeybta hoose. Doorbiditaanka luuqada waxaa ku jira Ingiriiska ama Isbaanish.

*Fiiro gaar ah: Cusbooneysiinta warbixintaada ee Aqbaarta Baska MA badeleyso warbixintaada ee Xarunta Infinite ama Bogga Waalidka. Haddii aadan geli karin Bogga Waalidka, cusbooneysii warbixintaada adiga oo la xiriirayo xafiiska hore ee dugsigaaga.

2090 W. 7th Ave. Denver, CO. 80204
720-423-4600 • transportation.dpsk12.org